**<u>Hab doorasho oo meel dhexaad ah</u>**

1. Wadatashiyadii lala yeeshay dadka Soomaaliyeed ee jooga dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba waxaa ka soo baxay in aysan jirrin hal nooc oo doorasho sida ku cad Tilmaamaha Habraaca Fududeynta, oo ka jawaabi kara baahida degaanada Soomaaliyeed ee kala geddisan. Sidaa darteed, arrintan waxay u baahan tahay in la isla qaato la islana hirgeliyo hab doorasho oo soo wada koobaya afarta nooc ee doorasho oo ah mid meel dhexe la isugu yimaado si loo xaqiijiyo in wax laga qabto welwelka dhabta ah ee ka jira deegaanada kala geddisan. Arrimaha welwelka lehna waxay kala yihiin:

- Habka awood qaysiga ee 4.5 waa inuusan weli sii ahaanin halbeegga ugu muhimsan oo lagu sargoynayo metelaadda siyaasadeed. Inkastoo ay sidaa tahay, haddana waxaa loo baahan yahay in la xaqiijiyo in isku dheellitirnaanta beelaha inay weli sii jirto. Tani waxay u baahan tahay in la adeegsado nidaam doorasho oo kulminaya arrimaha kala duwan ee metelaadda iyo in la sii wado in kuraasta baarlamaanka lagu qaybsado habka awood qaysiga 4.5, si loo billaabo in laga gudbo habka beelaha.
- Xisbiyada siyaasadda waxay gacan ka geysanayaan in la abuuro baarlamaan aad u xasilloon. Si loogu dhaqaaqo dhanka sameynta nidaam doorasho oo ku dhisan xisbiyo siyaasadeed, habka doorasho waa inuu ururrada siyaasadda u abuuro kaalin loogu gudbo doorasho dadweyne. Tani waxay gacan ka geysan kartaa in la abuuro baarlamaan aad u xasilloon muddada 2016-2020.
- In la dhiso ergooyin doorasho oo ka tarjunta degmooyinka waa inay horumariso isla-xisaabtan dhexmara xildhibaanada iyo deegaanada laga soo doorto.
- Dowlad Goboleedyada Federaalka ee hadda jira iyo kuwa sameysmaya waxay asaas u yihiin Soomaaliya oo federaal ah. Tani waxay u baahan tahay inay ka muuqato go'aaminta baaxadda ergooyinka doorashada ee u dhiganta tirada metelaadda ay Dowlad Goboleedyada Federaalku ku yeelanayaan baarlamaanka.

2. Habka doorasho ee ka soo baxaya arrimahan aan soo sheegnay wuxuu noqon karaa sida soo socota:

**<u>Soo xulidda ergooyinka doorashada:</u>**

- Xildhibaanada baarlamaanka ee hadda jooga ayaa sheegaya Dowlad Goboleedka ay ka yimaadeed, ha ahaadeen kuwa hadda jira ama kuwa sameysmaya. Tani waxay dhaleysaa in tiro cayiman oo ka mid ah kuraasta baarlamaanka ay sheegtaan mid kasta oo ka mid ah Dowlad Goboleedka Federaalka ee ay ka mid yihiin, kuwa hadda jira iyo kuwa sameysmayaba. Xildhibaan kasta waa inay soo doortaan 30 ergo/codbixiye. Tirada kuraasta baarlamaanka ee gobol kasta oo lagu dhuftay 30 ayaa xaddidaysa tirada guud ee cod bixiyeyaasha dowlad goboleed kasta (tusaale, dowlad goboleed leh 29 kursi oo lagu dhuftay 30 waxaa ka imanaya 870 cod bixiye). Haddii la eego dalkoo dhan, arrinta waxay abuuraysaa in wadar tiro oo ah 275 x 30 = 8,350 codbixiye: waana tiro aad uga badan 135kii odey ee sannadkii 2012, waana arrin weli suuratagal ah.
- Odeyaasha beelaha (135) ayaa soo xuli doona ergooyinka doorashada, oo ku shiri doona magaala madaxda dowlad goboleedka. Markay soo xulayaan cod bixiyeyaasha, odeyaasha beeluhu waa inay tixgeliyaan in tiradu ay ka tarjumto beelaha hoose/jufooyinka iyo degmooyinka si ergooyinka doorashadu ay ugu dambeyntii u metelaan degmooyinka Soomaaliya. Waa in tiro 30% loo qoondeeyo haweenka dhammaan ergooyinka doorashada. Sidoo kalena waa in 30% loo qoondeeyo dhallinyarada, iyo metelaad ku filan la siiyo qaybaha kale ee dadka sida bulshada rayidka. Inkastoo odeyaasha dhaqanku ay soo xuli doonaan ergooyinka doorashada, haddan habka

ay raacayaan shuruud adag ayaa xaqiijin doonta hufnaan iyo isla xisaabtan sare loo qaaday marka la barbardhigo kii sannadkii 2012.

**Nidaamka doorashada:**

- Kuraasta baarlamaanka ee 275ta ah waxaa weli lagu qaybsanayaa habka awood qaybsiga 4.5.
- Ururrada ama kooxaha siyaasadda ee heer qaran ayaa u tartamaya codadka (xisbigu wuxuu soo bandhigayaa liiska 275 murashax oo ka tarjumaysa habka 4.5). (Waraaqaha cod bixintu waxay muujin doonaan magacyada xisbiyada oo keliya.)
- Murashax kasta oo u hanqaltaagaya inuu noqdo Ra'iisal Wasaare waa inuu gudbiyo liiskaas oo kale. Liis kastoo doorasho waa inay ku qornaato ugu yaraan 20 iyo ugu badnaan 50 ka mid ah xildhibaanadda hadda ka tirsan baarlamaanka si loo xaqiijiyo in waayo aragtinimada hadda jirta ka sii socoto baarlamaanka cusub. Si loo dhiirrigeliyo isbedel siyaasadeed, 50ka ugu sarreeya liiska murashaxiinta waa inaysan ku jirin wax ka badan 10 ka mid ah magacyada xildhibaanada hadda jooga.
- Ururrada siyaasaddu waa inay xaqiijiyaan in liiskooda tiro 30% ah ugu qoondeeyaan haweenka, tiro 30% ahna u qoondeeyaan dhallinyarada, iyadoo 5tii murashaxba (iyadoo la eegayo 4.5) mid ay haween tahay, 5tii murashax midna (iyadoo la eegayo 4.5) uu yahay wakiil dhallinyaro.
- Codeynya iyo tirinta codadka waxay ka dhacayaan heerka magaalo madaxda dowlad goboleedyada (iyadoo Somaliland loo sameynayo hab gaar ah, oo ay codeyntu ka dhacayso magaalada Muqdisho) laakiin codadka waxaa la isugu geynayaa (tirinayaa) heer qaran.
- Codadka waxaa lagu tirinayaa nidaamka metelaadda isu dhiganta; liis kasta wuxuu kuraasta baarlamaanka ka helayaa tiro u dhiganta boqolleyda (%) codadka uu helay.
- Liiska (xisbiga) hela tirada kuraasta ugu badan ayaa magacaabaya Ra'iisal Wasaaraha, soona dhisaya dowladda. Haddii liisna (xisbina) ama ururna uu ku guuleysan waayo aqlabiyad buuxda, waxaa la sameynayaa dowlad wadaag ah.

**Arrimo tixgelin dheeraad ah leh**

- Habkan wuxuu kulminayaa dhammaan afarta hab oo doorasho loo qaban karo sida ku qeexan tilmaamaha habraaca fududeynta.
- Dowlad Goboleedyadu waxay u baahnaan karaan inay wadahadal siyaadeed ka yeeshaan sida hadda loo qaybsado kuraasta baarlamaanka si loo xaqiijiyo isku dheellitirnaan qaybsi/metelaad u dhexeysa dowlad goboleedyada federaalka.
- Codbixiyeyaasha ay soo xulaan odeyaasha beelaha waxay u baahnaan doonaan in la baaro si loo xaqiijiyo inaysan ahaanin mid lagu eexday, laakiin ay ahaato mid caddaalad ah, metelaad ku filana siinaysa beelaha hoose/jufooyinka iyo degmooyinka dalkoo dhan.
- Waxaa loo baahan yahay in la baaro/la hubsado saamiga haweenka, dhallinyarada iyo bulshada rayidka loo qoondeeyo ergooyinka doorashada.
- Habkan kuma xirna dhammeystirka/ansaxinta xeerka xisbiyada siyaasadda laakiin waxaa loo baahnaan doonaa hannaan sharci u gaar ah ee lagu maamulo geeddi socodka doorashada.
- Urur siyaasadeed kasta wuxuu u baahnaan doonaa inuu diyaariyo "liis xiran" oo ka kooban 275 murashax oo ka tarjumaya habka awood qaybsiga 4.5, sidoo kalena 30% u qoondeynaya haweenka iyo dhallinyarada midkiiba. Liisasku waxay u ekaan doonaan sida soo socota:

| *Jaantuska liiska xisbiga* | | | | |
|---|---|---|---|---|
| 1 | Magac | Beesha 1 | Kooxda murashaxiinta waa wada rag | Ugu yaraan mid ka mid ah murashaxintan waa inuu ahaado wakiilka dhallinyarada (ka yar 35 sanno) |
| 2 | Magac | Beesha 2 | | |
| 3 | Magac | Beesha 3 | | |
| 4 | Magac | Beesha 4 | | |
| 5 | Magac | Beesha 5 | | |
| 6 | Magac | Beesha 1 | Kooxda murashaxiinta waa wada haween | Ugu yaraan mid ka mid ah murashaxintan waa inuu ahaado wakiilka dhallinyarada (ka yar 35 sanno) |
| 7 | Magac | Beesha 2 | | |
| 8 | Magac | Beesha 3 | | |
| 9 | Magac | Beesha 4 | | |
| 10 | Magac | Beesha 5 | | |
| 11 | Magac | Beesha 1 | Kooxdan iyo kooxda soo socota ee midkiiba ka kooban shan murashax waa wada rag, midka kaa ku xiga waa wada haween;<br><br>markaa ka dib, labadii kooxba oo mid walba ay ka koobantahay shan murashax waa wada rag, hal koox oo ka kooban shan murashaxna waa wada haween, imw. | Saddexda kooxood ee xigta ee mid walba ay ka koobantahay shan murashax, ugu yaraan lab aka mid ah murashaxiinta waa inay ahaadaan wakiillo dhallinyaro (ka yar 35 sanno);<br><br>markaa ka dib saddexdii kooxba oo mid walba ay tahay shan murashax, ugu yaraan mid ka mid ah murashaxiinta waa inuu ahaado wakiil dhallinyaro (ka yar 35 sanno);<br><br>markaa ka dib saddexdii kooxba oo mid walba ay tahay shan murashax, ugu yaraan laba ka mid ah murashaxiinta waa inuu ahaado wakiil dhallinyaro (ka yar 35 sanno), iwm. |
| 12 | Magac | Beesha 2 | | |
| 13 | Magac | Beesha 3 | | |
| 14 | Magac | Beesha 4 | | |
| 15 | Magac | Beesha 5 | | |
| … | … | … | | |